# SOMALI VOICE OF NEW ERA PROGRAM NO 0966
# THE EPISTLE OF HEBREW
# 7:4-24

Halkani waa raadiyo Transworld oo idinku soo dhowaynaya barnaamij tafsiir ah oo soconaya muddo nusa-saac ah. Waxaana barnaamijkan Codka Waayaha Cusub ee waxbaridda ah idiin soo diyaariya Masiixiyiin Soomaali ah, waxaana laga maqlaa barnaamijkan habeenka Isniinta ilaa iyo habeenka jimcaha, saacaddu markay tahay 7:25ka fiidnimo, mawjadda 31ka miterband.

**OPENING SINGNATURE TUNE UP 25 SEC. AND UNDER.**

Mar kale ayaannu dhegaysatayaal idinku soo dhowaynayaa barnaamijka, waxaannu horey idiinku sii wadaynaa daraasaadka aynu ka soo xiganayno kitaabka qoduuska ah ee aynu ugu magac-darnay, **"Dhex-marka Kitaabka Qoduuska ah."** Waa barnaamij aad ku baranaysaan kutubta Babaylku uu ka kooban yahay, haddii ay ahaan lahaayeen kuwii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub.

Waxaannu caaway idiin sii wadi doonnaa cutubka warqaddii Cibraaniyada loo qoray, waxaana diiradda la saarayaa in Masiixu yahay Wadaadkeenna Sare. Waxaana lagu macneeyaa wadaadnimadii9sa isla sidii derajadii Malkiisadaq.

**SONG: REEL---CUT---**

Markii noogu dambaysay dhegaystayaal waxay inoo joogtay faalladii aynu ka bixinnay aayaddii 3aad ee cutubka 7aad, waxaanan garannay in Malkisadaq aanu Aabbe iyo Hooyaba lahayn, oo welibana aanu abtir lahayn, sababtaas aawadeed wuxuu Malkisadaq ahaa mid lagu sifeeyo Ciise Masiix, sida ku qoran Sabuurka 110. Markii aad eegto qisadii Malkisadaq ee ku qornayd kitaabka Bilowgii, waxaa ku qornayd

in Malkisadaq nebi Ibraahim u yimid wakhti ku habboon, nebi Ibraahim wuxuu ku dhowaa in la jirrabo, wuxuuna u baahna inuu helo qalbiqaboojin iyo weliba in la xoogeeyo.
Malkisadaq wuxuu la yimid kibis iyo khamri wuxuuna ahaa wadaadka Ilaaha ugu sarreeya waana markii ugu horraysay, sida Qorniinku leeyahay, ee Ilaah loogu yeero Ilaaha ugu sarreeya. Wuxuu u yimid isla markii boqorkii Sodom nebi Ibraahim uu ku lahaa: "Ibraahimow way wanaagsanayd naad soo furato wiilkaaga Luut iyo dhammaan dadkii kale, waanan kaaga mahadcelinayaa. Waxaan garanayaa inaadan doonayn in dadkan aad soo furtay ay addoommo kuu noqdaan. Markaa dadka na sii oo bililiqada qaado. Markii la eego sharcigii ama xeerkii Hamuraabi ee maalintaas, waxaa bililiqada iska lahaa Ibraahim, laakiin nebi Ibraahim wuxuu yiri,
**"Gacantaydaan kor u taagay, oo waxaan ku dhaartay Rabbiga, kan ah Ilaaha ugu sarreeya ee leh Samada iyo Dhulka inaanan qaadanin miiq ama kab yeel-madeed ama wax adigu aad leedahay, waayo waaba intaasoo aad tiraahdaa anaa Aabraam hodan ka dhigay."**
Isla markiiba Ilaah baa u muuqday nebi Ibraahim, oo wuxuu ku yiri, sida ku qoran kitaabka Bilowgii 15:1, waxana qoran sidatan: **"Waxyaalahaa kaddib hadalkii Ilaahbaa Aabraam ugu yimid muuqasho ahaan isagoo leh: Aabraamow ha baqin anigaa ah gaashaankaaga,
abaalgudkaaguna aad buu u weynaan doonaa."**
Haddaba Malkisadaq Ibraahim buu u yimid wuuna u adeegay. Sayid Ciise Masiix waa wadaadkeenna sare oo isagu innaga ayuu inoo adeegaa, oo hadduusan inoo adeegin, oo uusan qalbigayaga iyo noloshayada

barakadayn, waan hoogaynaa, sababtoo ah waxaa taas ugu wacan inaan innagu ilmo nahay, mana aydaan gaarin runtaan wayn ee inoogu qoran Kitaabka Cibraaniyada. Saaxiibkayaga qaalig aahow miyaad dhib iyo xiisado badan weligaa la kulantay? Oo miyaa Masiixu kuu hawlgalay oo kaa saaray dhibaatadaadii?

Miyaadse garanaysaa in Masiixu maalin waliba ku barakadeeyo? Haddaba waxaan garanayaa wakhtiyo fara-badan inta aan hawsha Masiixa ku jira, oo dhibaatooyin kala duwan la kulmay. Ha yeeshee Masiixa ayaa dhibaatooyinkii oo dhan iga caawiyey, markaa ma ahan wax nasiib ku yimaada in caawimaad aad hesho, laakiin waa kutalagal Ilaah, waayo isagu waa Ilaah nool oo kara inuu badbaadiyo oo ka caawiyo dhibaatada mid waliboo isaga rumaysan. Waxyaalahaas aan idiin sheegayana waa waxyaabo xaqiiqo loo arkay. Bal imminkana aynu eegno waxa ku qoran 14:19, markaasoo Malkisadaq barakadeeyey nebi Ibraahim, oo wuxuu yiri:

**"Ilaaha ugu sarreeya ee leh Samada iyo Dhulkaba ha barakadeeyo Aabraam."**

Haddaba aniga iyo adigaba waxaynu ku nool nahay duni Ilaah abuuray, wax waliba oo yaallana isaga ayaa leh. Haddaba dhegayste miyaad ku raaxaysataa waxyaalahaas Ilaah uu abuuray, miyaadse la yaabtaa Qorraxda ama dayaxa oo soo baxaya, markaad aragto? Waa marka Dayuxu uu 14aad yahaye?

Qorshayaasha dunida uu u dejiyey Ilaah isma beddelaan, oo Qorraxdu Beri bay ka soo baxdaa oo Galbeed bay u dhacdaa, isla sidii ay weligeedba ahaan jirtay. Sabuurlaha oo isaga qudhiisaba la yaabanaa cajaa'ibyada Ilaah ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran Sabuurka 19:1 sidatan: **"Samooyinku**

**waxay caddeeyaan ammaanta Ilaah, cirkuna wuxuu muujiyaa sancadii Gacantiisa."** Masiixa noolna wuxuu hareer fadhiyaa gacanta midig ee Ilaah. Miyey taas kuu xaqiiqsan tahay dhegaystow? Haddaan intaas uga gudubno maaddadii hore ayaannu imminka u guda-gelaynaa maadadan cusub ee kale ee ah:

IN MASIIXU YAHAY WADAADKA KAAMILKA AH

Haddaan arrinkaasisaga ah idiin guda-galno ayaannu imminkana idiin bilaabaynaa kitaabka Cibraaniyada 7:4, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Haddaba ka fiirsada ninkanu siduu u weynaa, kan Ibraahim oo madaxda awowayaashii ahi meeltobnaad ka siiyey boolidii."**

Ibraahim wuxuu meeltobanaadyo siiyey Malkisadaq, wuxuuna garansiisnaa in Malkisadaq uu ka sarreeyey oo uu ahaa wadaadka Ilaaha ugu sarreeya. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska kitaabka ayaannu imminka eegaynaa warqaddii loo qoray Cibraaniyada 7:5, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Oo runtii kuwii qoladii laawi oo helay shuqulka wadaadnimada waxay haystaan amar ay dadka kaga qaataan meeltobnaadka sida sharcigu leeyahay, kuwaas waxaa weeye walaalahood in kastoo ay kuwanu ka yimaadeen xajaadka Ibraahim."**

Haddaba Ibraahim oo reer Laawi ay ka soo farcameen ayaa Malkisadaq siiyey meeltobanaadyo, waxaa markaasi taasu ay muujinaysaa in Malksadaq wadaadnimadiisu ay ka sarrayso tii reer Laawi ee ay hormoodka ka ahaayeen Haaruun iyo Faraciisii. Saaxiib mid ka mid ah sida aad u sharfi karto Masiixa waxaa weeye inaad hadiyado ku bixiso magaca Masiixa. Waxaad hadiyahada u hibaynaysaa Masiixa hadddii aad wadaad tahay iyo haddii

kaleba. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska ayaan imminka eegaynaa 7:6, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Laakiin kii aan iyaga ku abtirsanin ayaa wuxuu Ibraahim ka qaatay meeltobnaadyo, oo barakeeyey kii ballamada loo qaaday."**

Waxay haddaba kula noqon kartaa in Ibraahim ka sarreeyey Malkisadaq, laakiin kama uusan sarraynin. Malkisadaq wuxuu ka mid ahaa quruumaha, wuxuuna ahaa wadaadka ugu sarreeya. Haddaba ninna garan maayo sida uu ku bartay Ilaah, oo weliba cid garan mayso Malkisadaq qudhiisa. Haddii qofi isku dayo inuu wax kaaga sheego Malkisadaq, mala'awaal buu ku shaqeeyaa qofkaas isaga ah ee kaama xog ogaalsana.

Waxaa kaloo jira waxyaabo fara badan oo aannaan ka garanaynin Masiixa, waayo waa Wiilkii Ilaah oo weligiiba wuu jiri-jiray. Bal hal baanse garanayaa, waxaana weeye inuu yahay Wadaadkayga sare maanta. Intaas ayaa ahmiyadduna ay tahay, oo waa inaan ogaado in Masiixu uu yahay wadaadkayga Sare iyo inuu yahay saaxiib, wadaadkaaga sare. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal faalladan kitaabka ayaannu imminka horey idiinku sii wadaynaa 7:7, waxaana qorans idatan:

**"Laakiin muranla'aan kan yar waxaa barakeeya kan ka wanaagsan."** Haddaba sida muuqata Ibraahim waxaa barakeeyey Malkisadaq oo isaga wadaad u ahaa. Markii aynu innaga Ciise Masiix hoos nimaadno oo aynu hoostiisa jilbajoogsanno, waxaannu qiranaynaa in Masiixu sarreeyo, markaa Malkisadaq wuu ka sarreeyey Nebi Ibraahim bacdamaa Malkisadaq uu wadaad u ahaa nebi Ibraahim. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriskan ayaand hegaystayaal

eegayaa aayadda 8aad ee cutubka 7aad, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan: **"Oo halkan waxaa meeltobnaadyada qaata dadka dhinta, laakiin halkaas mid loo markhaati furay inuu nool yahay."** Marka qoruhu uu leeyahay, **'Dadka dhinta'** ayuu ula jeedaa reer wadaaddada reer laawi. Marka uu leeyahay, **'Laakiin halkaas mid loo markhaati furay,'** ayuu ula jeedaa Malkisadaq. Haddaba Malkisada wuxuu u taagan yahay Masiixa, oo haddii aad isku dhiibto wuu ku qaabilayaa. Markii aan isku dhiibo isaga waxba iga faa'iidi maayo, laakiin aniga ayaa faa'iidaya. Isaga faa'iidadiisu waxaa weeye inuu badbaadiyo dadka oo dhan, waxaanan Ilaah uga xamdinaqayaa inaanu I soo celinaynin.

Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal kitaabka cibraaniyada 7:9-10 ayaa waxaa qoran sidatan:

**"Waxaa la odhan karaa, Laawiga meeltobnaadyada qaataana, Ibraahim meeltobnaadyo ayuu ku bixiyey. Waayo, isagu weli xajaadkii aabihiis buu ku jiray kolkii Malkisadaq la kulmay."**

Reer Laawi oo iyagu qaataan meeltobnaadyada ayaa waxay bixiyeen **'meeltobanaadyo'** intii ay xanjaadkii Ibraahim ku jireen. Waxaa taasu ay la mid noqonaysaa in markii nebi Aadan dembaabay in innaga oo dhaniba aynu dembaabnay, waayo markii Ibraahim meeltobanaadyada uu bixiyey wuxuu ka bixiyey oo kale kuwii isaga ka soo farcamay oo dhan, reer Laawiba ha ugu horreeyaane.

Haddaba markii nebi Aadan dembaabay haddana dembiyadiisii buu ku dhintay, ha yeeshee maanta anigu waxaan ahay mid kaamil ah, waayo waxaan ku jiraa Masiixa. Miyaad haddaba garanaysaa

dhegaystow ama ma og tahay in Ilaah iga dhex arko Masiixa oo isaga ayaan kaamilku ahay, oo waxaa laygu dhex aqbalay kan la jecel yahay dhexdiisa. Saaxiib taasina waa hadal hubaal ah, oo si cad baa loo sheegayaa. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriskan ayaannu imminkana idiin akhriyeynaa 7:11, waxaana Qorniinku uu leeyahay sidatan:

**"Haddaba haddii kaamilnimo ku jirtay wadaadnimadii Laawi, waayo, iyada ayuu dadka sharciga ka hoos helaye, maxaa weli loogu baahnaa in wadaad kale ka kaco derajadii Malkisadaq oo aan lagu magacaabin derajadii Haaruun?"**

Marka dhanka kale laga eego, ayaa waxa lagu yaqaanno wadaadnimadii Haaruun waxaa weeye inaanay dhammayn, welina ma keenin kaamilnimo iyo in wehelnimo lala lahaado Ilaah. Welibana furasho iyo qaabilaad lagama heli jirin wadaaddada, oo wadaanimadii Haaruun lagama yoolgaarin sababtaas daraaddeed ama sababtaas aawadeed ayaannu innagu ugu baahan nahay Masiixa. Weli waxaannu ku jirnaa isla kitaabka Cibraaniyada waxaana imminkana idiin akhriyeynaa aayadda 12aad ee cutubka 7aad, waxaana qoran sidatan:

**"Waayo, wadaadnimada markii la beddelo waa lagamamaarmaan in sharcigana la beddeo."**

Haddaba innagu kama hoosayno sharciga. Sharcigii Muuse wuxuu qayb ka ahaa wadaadnimadii Haaruun, halkaasoo dadka ay keeni jireen allabaryo ay xoolo dhiiggood daadinayaan. Markaa sharcigii nebi Muuse iyo wadaadnimadii Haaruun way wada socotaa. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 7aad ayaannu imminkana idiin akhriyeynaa aayadaha 13-14, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:

**"Waayo, kii waxyaalahan laga sheegay waa qolo kale oo aan nin meeshii allabbariga ka shaqeeyey ka iman. Waa cad dahay in Sayidkeennu ka soo baxay Yahuudah, oo ah qolo aan Muuse kaga hadlin wax wadaaddo ku saabsan."**

Sayid Ciise Masiix wuxuu ka dhashay reer Yahuudah oo ma ayan lahayn wadaadnimo dunida laga dhex adeegayo. Qabiilkii wadaaddada ahaa waxay ahaayeen qabiilkii reer Laawi, markaa waa in la beddelaa wadaadnimada, maaddaama Masiixu uusan ka imaanin reer Laawi. Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal meeriskan, ayaannu imminkana eegaynaa 7:15, waxaana qoran sidatan:

**"Oo weliba aad bay u sii cad dahay, haddii wadaad kale oo Malkisaaq u egi kaco."**

Taasina waa waxa Sabuurka 110 ka hadlayo marka la eego Masiixa oo isagu imaan doonay wakhtigaas isaga ah. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriskan, ayaannu imminka eegaynaa 7:16-17, waxaana Qorniinka qodduuska ahi leeyahay sidatan:

**"Kii aan wadaad lagaga dhigin sharciga abtirsiinyada xagga jidhka, laakiin xagga xoogga nolosha aan dhammaadka lahayn. Waayo, isaga waxaa loogu markhaati furay, Adigu weligaaba wadaad baad tahay Sidii derejadii Malkisadaq."**

Masiixu wuxuu noqday wadaad kaddib markii uu dhimashada ka sarakacay. Wuxuu leeyahay nolol aan dhammaan. Haddaan horey idiinku sii wadno meeriska cutubka 7aad, ayaannu imminka eegaynaa aayadda 18aad, waxaana qoran sidatan:

**"Waayo, amarkii hore waxaa loo buriyey itaaldarridiisii iyo faa'iidola'aantiisii."**

Sharcigii Muuse qaab wuu yeelan waayey oo wuu duugoobay. Sharciga lagama heli karin waxa dadku

ay aad u doonayeen, waana kaamilnimo. Haddaan horey idiinku sii wadno kitaabka Cibraaniyada 7:19 ayaa waxaa qorniinku leeyahay sidatan:

**"Maxaa yeelay, sharcigu waxba ma uu kaamilin. Oo waxaa la keenay rajo ka wanaagsan oo aynu Ilaah ugu dhowaanno."**

Marka ay sidaasi tahay waxaannu Ilaah ugu soo dhowaanaynaa Masiixa, waxaanan arkaynaa in Sayid Ciise Masiix uu ahaa wadaad weligiis, oo welibana kaamil ah. Ha yeeshee wadaadnimadii Haaruun qabyo ayey ahayd. Masiixu wuu ina kaafiyey, oo Ilaah wuxuu inaga soo waday Aadan, wuxuuna ina dhex keenay Masiixa. Bawlos oo arrinkaas isaga ah balballaarinaya ayaa wuxuu leeyahay sida ku qoran Warqaddii 2aad ee reer Korintos 5:17, waxaana qoran sidatan:

**"Sidaad daraaddeed haddii qof ku jiro Masiixa waa abuur cusub, oo waxyaalihii hore way idlaadeen. Bal eega wax waliba way cusboonaadeene."**

Markaa haddi aynu Masiixa ku dhex jirno, waxaynu ku dhex jirnaa mid nool. Waxaanan ka soo tagnay maydnimadii hore ee Aadankii ku dhintay dembiyadiisa aynu ku dhex jirnay. Haddaba waxaannu soo koobaynaa farqiga ay ku kala duwan yihiin wadaadnimadii Haaruun iyo tii Malkisadaq. Waxaanan u kala dhignay sidatan soo socota:

1. In sharciga wax adkeeyo waxaana taas liddi ku ah, awoodda oo iyadu hirgalisa wax waliba.
2. Sharciga oo isagu ah wax dibadda ah ayaa isaguna ka soo hor jeeda nolosha oo wax gudaha ah.
3. Jidhka ayaa isaguna liddi ku ah nolosha daa'imka ah, waxaana loo macnayn karaa Sharcigii Muuse iyo Masiixa sida wax isbeddelaya iyo wax aan isbedelayn.

4. Waxaa kaloo loo kala dhigi karaa itaaldarro iyo wax faa'iido lahaa oo liddi ku ah wehelnimada Ilaah iyo rajola'aan ka soo horjeedda rajo wanaagsan. Haddaan iskubarbardhiggii Sharciga iyo Masiixa intaas uga baxno, ayaannu imminkana meeriska cutubka 7aad dib ugu noqonaynaa, waxaanan idiin akhrinaynaa aayadaha 20-21, waxaana qoran sidatan:

**"Oo isagu dhaarla'aan wadaad kuma noqon. Iyagu dhaarla'aan bay wadaaddo ku noqdeen, laakiin isagu wuxuu ku noqday dhaarta kan ku yidhi, Rabbigu waa dhaartay, kana soo nqoon maayo, Adigu weligaaba wadaad baad tahay."**

Waxaa loo soo xiganayaa mar kale Sabuurka 110 oo isagu ah waxyi khuseeya imaanshaha Masiixa, oo isagu ahaa Sayid Ciise Masiix. Wuxuna ku yimid habkii ama hannaankii Malkisadaq. Waxaana xigashada qoruhu uu soo xigtay ay ku qoran tahay Sabuurka aayadda 4aad ee isla Sabuurka 110aad, markaasoo Sabuurluhu uu leeyahay: **"Rabbigu wuu dhaartay kana soo noqon maayo, Adigu weligaaba wadaad baad tahay sidii derajadii Malkisadaq."**

Haddaba hal maaddo oo ka dhigaysa wadaadnimada Masiixa mid sare ayaa waxay tahay inaanay ku salaysnayn wadaadnimadiisa Hadalladii looga qoray Qorniinka, laakiin waxay kaloo ku salaysan tahay dhaartii Ilaah. Markii aad eegto wadaaddadii Axdigii Hore, ayaa wadaaddada reer Laawi, kuwooda ka soo farcamay Haaruun gees loogu bixin jiray hawsha adeegista macbudka gudihiisa ah. Haddaba dhaar laguma gelin in kuwaasu Ilaah hawl u qabtaan.

Haddaan horey idiinku sii wadno haddaba meeriska cutubka 7aad, ayaannu imminka eegaynaa aayadda 22aad, waxaana Qorniinku leeyahay sidatan:
**"Oo sidaasuu Ciise ku noqday dammiinka axdiga ka wanaagsan."** Marka ay sidan tahay Ciise kuma haysanno oo keliya wadaadnimo wanaagsan ama heerkeedu sarreeyo, laakiin waa dammiinka axdiga ka wanaagsan, wuxuuna ka adeegaa axdi ka sarreeya kii hore oo laga dul dhisay ballamada. Haddaba maaddadan oo la balballaariyey waxaannu ku arki doonnaa cutubyada 8-10. Wadaadnimada Masiixana wax loo dhigo la heli maayo. Waxaanse imminka mar kale eegaynaa maaddada kale ee ah:

**IN MASIIXU UU YAHAY WADAAD WELIGIIS IYO MID KAAMIL AH.**

Haddaan horey idiinku sii wadno dhegaystayaal meeriska cutubka 7aad ayaannu dhegaystayaal idiin akhriyeynaa aayadda 23aad, waxaana qoran sidatan:
**"Iyaguna waxay noqdeen wadaaddo tiro badan, maxaa yeelay, dhimashada ayaa ka joojisay inay sii jiraan."**
Marka dhanka kale laga eego, wadaadnimadii Haaruun ee Axdigii Hore waxay dhammaadkeedu ahayd dhimasho. Haaruun wuu dhintay, Muusena wuu dhintay, oo dhamashadii Haaruun waxay reer binu Israa'iil ku noqotay naxdin isla sidii tii Muuseba ay ahayd, oo geeridooda aad baa looga naxay. Hase yeeshee tii Haaruun baa aad iyo aad ugu xanuun badnayd iyaga, waayo Haaruun wuxuu ahaa wadaadkooda sare, waayo wuxuu ahaa mid ay aad u garanayeen. Isaguna wuxuu garanayey dhibaatooyinkooda iyo sida ay dhanka qalbiga ka dareemayeen, maxaa wacay wuxuu ahaa wadaadkooda. Markii uu cidlada ku dhintay waxay ahayd inay mid

kale ka doortaan wiilashiisa. Hayeeshee aniga iyo adiga dhegaystoow waxaan leennahay mid aan is-beddelayn, waana Ciise Masiix.

Masiixu waa mid nool oo had iyo goorba innaga inoo soo ducaynaya. Haddaan horey idiinku sii wadno kitaabka Cibraaniyada ayaannu imminka idiin akhriyeynaa aayadda 24 ee cutubka 7aad, waxaana qoran sidatan:

**"Isaguse wuxuu haystaa wadaadnimadiisa aan beddelmi karin, waayo, weligiis buu sii jirayaa."**

Haddaan intaasi ku soo ekayno dhegaystayaal barnaamijkan ayaan rumaysanahay inaad garateen sida wadaadnimadii Masiixa kaga duwanayd wadaadnimadii Axdigii Hore ee uu hormoodka u ahaa Haaruun. Markuu wadaadku dhintana waxaa dhaxli jiray wiilashiisa, oo kan macbudka ka adeegaya oo noqonaya wadaadka sare waxay ahayd inuu ka yimaado reer Haaruun. Wadaadnimada Masiixa la kala dhaxli maayo, waayo Masiixa ayaa weligiiba wadaad ah.

**SONG: REEL---CUT----**

Halkani waa TWR, Idaacadda TWR oo idinku leh Ilaah haydin barakeeyo oo haydinku anfoco wixii aad caaway ka maqasheen barnaamijka. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli-doontaan habeen dambe (hadahan oo kale) isla mowjaddan 25ka miterban. Haddiise aad doonaysaan inaad fikirkiinna ka dhiibateen wixii aad caaway maqasheen ayaad nagala soo xiriiri kartaan somtwr@twr.co.ke.

Waxaad kaloo waraaqaha noogu soo qortaan: P.O.Box 21514, oo koodku yahay 00505. Waxaa kaloo aan idin siin doonaa website aad ka maqashaan barnaamijyadeenna Soomaaliga ah, si kuwiinna doonaya inay koorasyo ka qaataan Baybalka ay ugu hirgasho.

**SIGNATURE TUNE UP 6 AND UNDER**

Halkani waa TWR oo idiin rajaynaya Habeen Baraare iyo barwaaqaba leh. Inta aynu ka gaari doonno wakhti aynu ku kulanno Barnaamij la mid ah kan caaway aad maqasheen, waxaan idinku leenahay nabadda Ciise Masiix, ha idiinku badato xagga jidhka iyo ruuxaba Aamiin